

Warbixin ku socota Waalidka ama masuulka ilmaha hela caawimaada waxbarasho (studiehandledning) ee afkiisa hooyo.

Ilmahaagu maleeyahay af aan Swiidhish aheyn oo u ah afkiisa hooyo?

Ilmahaagu ma yahay ardey ku cusub iskuulada Sweden?

Badanaa waa ay adag tahay in markiiba lala qabsado waxbarasahada dugsiyada Sweden.

Luuqadu waa waxa ugu muhiimsan si loo barto aqoon cusub.

Waxaa jira dedaal caawimaad waxbarasho oo dugsiyada hoose, dhexe iyo Sareba laga helo taasoo loogu yeero "caawimaada waxbarasho ee afka hooyo" (studiehandledning på modersmålet) taasoo ilmaha luuqadiisa wax lagu fahansiinayo.

Caawimaadan waxbarasho (studiehandledning) ayaa ah mid ardeyga lagu caawinayo afkiisa ama luuqada uu Aadka u yaqaano ee iskuulka looga hadlo.

Caawimaadan waxbarasho (studiehandledning) ayaa ka saacideysa ardeyga horumarka aqooneed ee maadooyinka kala duwan.

Caawimaada waxbarasho (studiehandledning) waxaa ay ka caawinaysaa ardeyga yoolkiisa waxbarasho ama hadafkiisa waxbarasho.

Madaxa iskuulka ayaa go'aan ka gaaraya in ardeygu helo caawimaad waxbarasho oo afkiisa ah.

Caawiyaha ardeyga (oo ku hadla labadaba, luuqada ardeyga iyo Iswiidhish-ka):

- Waxaa uu ka shaqeeyaa sidii ardeygu hore ugu sii fahmi lahaa maadada ku adag ka hor wakhtiga casaharka.
- Waxaa uu siiyaa ardeyga erey iyo furaha fahamka guud ee maadada oo luuqadiisa uu ugu sharxayo.
- Waxaa uu siyya caawimaad ah habka waxbarashada iyo qaababka kala duwan ee wax looga shaqeeyo.
- Waxaa uu ka caawiyaa ardeyga inuu fahmo dhismaha qalabka waxbarashada.
- Waxaa uu ka caawiyaa ardeyga inuu fahmo dibna u hubiyo jihada casaharku u socdo.
- Waxaa uu ka saacidaa siduu ardayga shaqooyinka gaarka ah uu gacantiisa ugu qabsan lahaa.
- Waxaa uu si kooban ula hubiyyaa layliyada isagoo adeegsanaya afka hooyo.
- Waxaa uu nidaamiyaa waxbarashada ardeyga kadib marku xiisadu ay dhamaato.
- Waxaa uu qeexaa heerka aqoonta ardeyga ee ka baxsan qorshaha manhajka ee maadada.
- Wuxuu hubsadaa waxa ardeygu ka fahmay maadada.